12 SIYAABOOD 00 HAWEENKU

UGA BADQABI KARAAN KHATARAHA LAGALA KULMO ISTICMAALKA INTERNET-KA

Ka hortagga ayaa marwalba ka wanaagsan ka dabatagga. Istimaalka aadka u kordhaya ee baraha bulshadu waxa ay kor u qaadday walaaca laga qabo bad-qabka haweenka isticmaala barahaasi. Arrinka is weydiinta mudan ayaa ah ilaa heer ayuu gaarsiisan yahay amniga iyo ku badqabka dumarkaasi sida joogtada ah u isticmaala bogagga baraha bulshada?

Sida laga soo xigtay daraasad dhowaan la sameeyay, ayaa daaha ka qaadday in haweenku in ka badan ragga ay isticmaalaan internetka si ay xiriiro u samaystaan. Haweenka dhalinyarada ah, kuwa 18-24, waxay kala kulmaan Internet-ka noocyo kala duwan oo cagajuglayn, iyo hanjabaadba isugu jira. 71% haweenka ayaa tacadi loogu geystay baraha online-ka, waxayna si joogto ah ula kulmaan tacadiyo badan oo noocyo kala duwan isugu jira. Kuwaasoo ay ugu badan yihiin rakaato, baahin sawiro iyo muuqaalo qarsoodi, ceebayn, cay, aflagaado, hanjabaado iyo weliba in loo soodiro qoraalo iyo muuqaalo aysan raali ka ahayn oo badankood galmo la xiriira.

01 Qofna Hala Wadaagin Fure-Sireedkaaga

Sida caadiga ah majirto cid lambarsireedkeeda/kiisa la wadaagta cid kale, sax? Se waxaa laga yaabaa inaad la wadaagtay erayga sirta ah saaxiib aad isugu halayso karo ama lamaane. Laakiin waxkasta waa macquul. In kasta oo saaxiibbadu aanay si ula kac ah kuu waxyeeleyn, haddana waxaa laga yaabaa inay si kama' ah u ula wadaago lambarkaaga sirta ah qof kale. Waxa kale oo dhici karta in xiriirkii idinka dhexeeyey qofkaas uu isbaddel ku yimaado. Hadaba, marwalba feejignoow oo ha la wadaagin erayadaas sirta ah cidna!

02 Si Taxadar Uga Feker Markaad Sameysaneyso Fure-Sireedka

Habka ugu waxtarka badan ee aad iskugu ilaalin karto online waa inaad fikir badan geliso marka aad dooranayso erayada sirta ah. Ha u isticmaalin bog (website) kasta oo aad gasho lambar sired isku mid ah. Ha ka dhigan lambarsireedkaaga ereyo si fudud lagu qiyaasi karo sida magacaaga, kan hooyadaa, waqtiga dhalashaadaada, kooxda ciyaaraha aad taageerto IWM.

Haddii ay kugu adagtahay oo aadan kalsho u hayn maareynta iyo xifdinta lanbarsireedyada dhaadheer, tixgeli inaad isticmaasho Barnaamijka (password manager), mid bilaash ah ama mid aad iibsanayso. Waa Barnaamijka ugu habboon ee si fududna u isticmaalayso xogtaadana kuu xifdin kara. Waxaad kale oo isticmaali kartaa barnaamijyo bilaash ah sida Dashlane ama LastPass. Ha iloobin inaad si joogto ah u beddesho erayada sirta ah si aad uga hortagto burcadda Internet-ka.

03 Furo Inay Fariin Kusoo Dhacdo Mar Kasta Oo La Galo Akoonadaada

U furitaanka Bogagga (websites) iyo Barnaamijyada (Applications) aad si joogtada ah u isticmaasho ogeysiisyada galitaanka waxa ay kuu sahlaysaa in qof kasta oo gala akoonkaaga sababtay doonto ha noqotee aad hesho emayl ama farriin qoraal ah. Waxa lagu ogeysiin doonaa waxkasta oo uu qofkaasi ka dhex qabanaayo akoonkaaga, waxaadna si dhakhso ah u bedeli kartaa erayga sirta ah.

04 Ma Jiro Wax La Yiraahdo ‘Bilaash’

Ha taaban ogeysiisyada iyo lifaaqyada Bilaashka ah internetka, waxay u yimaadaan sida ciyaaro, adiga oo ku guuleystay lacago, dalabyo, heshiisyo, iwm. Waxay u badan yihiin inay ku jiraan fayrasyada, basaasida iyo software-ka waxyeelada leh. Kuwani waxay gali karaan moobilkaaga ama kambiyuutarkaaga iyaga oo gacanta ku dhigaya dhammaan xogtaada.

05 Xafid Badqabka Aaladahaaga Oo Dhan Adigoo Isticmaalaya Anti-Virus Lagu Kalsoon Yahay

Inaad haysato telefoonka gacanta kaas oon lahayn nidaam amni waxay ka dhigan tahay adigoo ku sugan guri aysan albaabadiisu xirmin. Aaladaha Android iyo Mac waxay halis ugu jiraan software-ka waxyeelada leh ee gelaya oo gacanta ku dhigaya noloshaada. Had iyo jeer ku rakib aaladahaaga nidaamyada amniga ah sida Norton Security, McAfee, Avast ama Eset.

06 Gali Akoonnadaada Kaliya Meelaha Leh Wi-Fi Ammaan Ah

Waxaa soo jiidasho leh ama mar walba ku duufsanaya inaad isticmaasho WiFi-ga bilaashka ah ee maqaayadaha si aad u hubiso emaylkaaga ama aad u bixiso biilal dhowr ah. In kasta oo isticmaalka Wi-Fi bilaashka ah laga yaabo inuu yahay wax fiican oo howl fududeys ah, sida akhrinta wararka ama ciyaarista PUBG, waxaa larabaa inaad iska ilaaliso galinta akoonnadaada amniga leh ee shabakadda dadweynaha, sida akoonkaaga bangiga onlineka ama akoonkaaga emaylka asaasiga ah. Kaliya galitaanka akoonkaaga hal daqiiqo waxay siin kartaa fursad qofka wax jabsanaya inuu arko macluumaadkaaga adigoo isticmaalaya xiriir aan ammaan ahayn.

07 1usbooneysii Dhammaan Nidaamyada Hawlgalka Qalabkaaga Elegtoroniga Ah

Waxa yara dhib badnaan kara cusbooneysiinta software-ka, laakiin si aad isku ilaaliso aad bay muhiim uyihiin. Cusbooneysiinta amniga waxay kaa ilaaliyaan hanjabaadaha. Had iyo jeer ku rakib iyaga iyadoon loo eegin si kasta ood mashquul u tahay.

08 Ilaali Kambiyuutarkaaga Iyo Telefoonkaaga

Xitaa hadii aad ka feejigan tahay amnigaaga si online ah, shaqadaas oo dhan hawada ayay gali kartaa hadii aad u ogolaatid cid kale inay isticmaasho kumbuyuutarkaaga. Ka taxaddar qofka aad u ogolaato inuu isticmaalo qalabkaaga, hana ka tagin kombiyuutar aan xirin oo u oggolaanaya qof kasta inuu isticmaalo. Haddii aad qasab tahay inaad la wadaagto kombiyuutarkaaga martida ama xubnaha kale ee qoyska, tixgeli inaad samayso akoonno shaqsiyeed (oo leh eraysireed) si loo hubiyo in macluumaadkaagu yahay mid ammaansan.

09 Akhri Qoraalka Yar Ama Nootiisyada Digniinaha Wata

Fahan ogowna siyaasada qaaska ah iyo shuruudaha adeeg kasta oo aad isticmaasho. Bogagga qaarkood waxay lahaan karaan, iibin karaan, kireyn karaan ama iibsan karaan macluumaadkaaga qof kasta ama cidkasta oo ay rabaan. Tani waxay dib ugu soo noqon kartaa dhibaato weyn iyo sharcigu ma awoodi karo inuu ku ilaaliyo maadaama aad aqbashay shuruudaha iyo xaaladaha.

10 Iska Xannib Cid Walba Aadan Rabin Inaad Saaxiib Ku Ahaataan Baraha Bulshada

Marna haka diiqadoon in aad diido codsiyada saaxiibtinimada ee dadka aad si yar isku taqaan. Ku kalsoonow dareenkaaga oo iska ilow, ka dhac ama xannibaad ku samee. Adiga ayaa dooranaya cida ku jirta liiskaaga saaxiibtinimada. Marka la eego amniga, labadaba online iyo offline, garashada guud waa difaaca koowaad. Dareenkaaga wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa ilaalintaada. Haddii wax u muuqdaan 'xun', raac dareenkaaga. Uma baahnid inaad u sharraxdo sababtaada qofna.

11 Siyaabaha Looga hortago In Lagaa Jabsado Aaladaha Iyo Akoonnada

Jabsoshada (Hacking) ka iyo shaacintu/soo qarxintu (doxing) ku waa laba hanjabaad oo kale oo online ah, kuwaas oo si gaar ah u waxyeellayn kara haweenka. Jabsoshada (Hacking)waxay ka dhigan tahay helitaanka aan la oggoleyn ee kombuyuutar ama Moobilkaaga, halka d iyo shaacintu/soo qarxintu (doxing) ku ay tahay soo gelinta macluumaadka shakhsiyeed ee qof si online ah.

Si aad naftaada uga badbaadiso jabsashada iyo faafinta macluumaadka shaqsiyadeed raac talaabooyinkaan soo socda:

- isticmaal eraysireed adag iyo two-factor authentication: labaduba waxay kaa caawinayaan in aan la jabsan akoonadaada.
- Feejignow marka aad gujinayso lifaaq ama aad dagsanayso faylal: ha gujin lifaaqyo ama ha dagsan faylal aadan garanayayn ilahooda maxaa yeelay waxay yeelan karaan malware, sida spyware. isticmaal software-ka anti-virus oo sii cusbooneysii si aad uga ilaaliso fayrasyada iyo software-ka waxyeelada leh ee kale.
- Ogow waxa aad samayn lahayd hadii lagaa jabsado qalabkaaga ama akoonkaaga: si dhakhso ah wax uga qabo. Beddel eraysireedkaaga, la xiriir hay'adahaaga maaliyadeed, oo tixgeli inaad geliso hakad ama xanibaad akoonkaaga si aad uga hortagto qof inuu ku furo akoono cusub magacaaga.

Ma rabtaa inaad hubiso haddii emaylkaaga ama nambarkaaga telefoonka la xaday ama xogtiisa la jabsaday?

Waxaad tagi kartaa **Have I Been Pwned**, waa bog faa'iido leh oo si dhakhso ah u baaraya oo aqoonsan kara akoonnada la xaday ee ku xidhan macluumaadkaaga shakhsiyeed. Talo kale oo fiican waa inaad mararka qaarkood is google garayso tan, waxaad arki kartaa macluumaadka ku saabsan adiga ee internetka laga heli karo oo aad ka saartaa haddii loo baahdo.

12 Siddee Haweenku Uga Gaashaaman Karaan Halista Kasoo Gaari Karta Internetka

- Taxaddar dheeri ah lahaw marka aad sawirradaada soo dhigaysid internet-ka: Waxaa la mid ah marka aad sawirrada aad qof kula wadaagaysid barnaamijyada farriimaha la isku dhaafsado, haddii ay mar internetka soo galaan in laga saaro wax adagtahay
- Isticmaal aqoonsiga multi-factor: Ha u ogolaan in ay cidna gasho Barnaamijyada aad farriimaha ku dirto iyo barahaaga bulshadaba
- Dareennadaada ku kalsoonow: Haddii qof aadan qancin hab-dhaqankiisa, inta uusan ku dhibaatayn xiriirka u jar
- Ha ka jawaab-celin farriimaha hanjabaada ah: Xannib soo diraha, ku wargeli dhacdada baraha bulshada iyo Mas'uuliyiinta wax ka qaban kara.
- Caawimaad dalbo: Caawimaad ka dalbo saaxiibadaa, qoyskaaga ama dhakhaatiirta haddii aad kala kulanto online-ka tacaddi jinsiyeed.

HAWA FEMINIST COALITION
COALITION OF YOUNG FEMINISTS IN SOMALIA
Find Us On:
@HawaFeminist
www.femsom.org